

Refugee Council

help and advice



May 2008

Somali

Dugsiyada caruurta – warqad war iyo xaqiiqooyin ah oo loogu talagalay waalidka qaxootiga ah

- Caruurta waxay xaq u leeyihiin inay tagaan dugsi inta u dhexeysa da'da 5 iyo 16 sannadood, iyo inay tagaan xanaanada (nursery) ka dib da'da 3 sannadood iyo 3 bilood. Maamulka waxbarashada ee degmadaada (local education authority - LEA) ayaa kaa gargaari doonaa inaad boos dugsi u heshid caruurtaada.
- Sharcigu waxa uu rabaa ama uu qorayaa in caruurta dugsi tagaan, adiga ayaana mas'uul ka ah inaad u habsatid inay tagaan dugsigaa. Haddii aanay dugsi tagin iyada oo aanay jirin sabab fiican adiga iyo caruurtaada labadiinuba waxa aad ku jirtaan khalad oo dhib baa idin soo gaadhi kara.
- Haddii ilmahaagu aanuu awoodin inuu dugsi tago sababta oo ah cudur waxa lagaa rabaa inaad sida ugu dhakhsaha badan ee suurogalka ah u ogeysiisid dugsi.
- Dugsiyadu waxay leeyihiin wakhtiyo bilaabis iyo dhamaad oo u gaar ah. Waxa muhiim ah in caruurtaadu wakhti haboon yimaadaan subixii si loo diiwaangaliyo.

Adiga iyo dugsi

- Waxa faa'iido leh inaad ka qaybgashid noloshada dugsi ee ilmahaaga adiga oo tagaya kulannada fiidkii ee waalidka taasoo fursad kuu siinaysa inaad la kulantid macallimiinta oo aad ka wada hadashaan horumarka ilmahaaga. Dugsiyadu waxay noqon karaan meelo fiican oo aad kula kulantid dadka. Marwalba waxay soo dhaweeyaan waalidka waxana ay ku farxi doonaan inay kula hadlaan.
- Ilmahaaga waxa la siin doonaa laylisyo guri oo joogto ah kuwaasoo la rabo inuu kaga soo shaqeeyo guriga. Kala qaybgal oo ka gargaar laylisyada guriga haddii aad awoodid, una hubso inay guriga ku helaan wakhti ku filan oo ay kaga shaqeeyaan sidoo kalena u hubso inay kaga shaqeeyaan wakhtigii loogu talagalay. Haddii layliska guriga lala soo raago ama aan laga soo shaqeyn, waxa dhici karta in taasi dhib u keento xagga dugsi.
- Haddii adiga ama ilmahaaga ay dhibaatooyin haystaan inta ay dugsi ku jiraan, raadi kuwa ay yihiin macallimiinta ilmahaaga. Waxay ku farxi doonaan inay kula kulmaan oo ay kaala hadlaan wixii walaac ah ee aad qabtid.

Akhlaaqda Xun

- Haddii ilmahaagu uu edeb-daro sameeyo waxa dhici karta in la dheereeyo mudada uu dugsi joogo si uu u dhameeyo shaqo dheeraad ah ama aanu hore u dhameystirin, ama si uu u gargaaro macallinkiisa. Tan waxa loo yaqaanaa hayn (detention). Haddii ilmaha laga rabo inuu ku soo hadho dugsi ciqaab ahaan, waa in macallinku ku siiyo ogeysiis ah 24 saacadood.
- Ciqaabta jidhku waa sharci-daro lagumana isticmaalo dugsiyada.

Qoraalo kale ayaa laga heli karaa bartan <http://languages.refugeecouncil.org.uk>

Qalab

- Waxa dhici karta in ilmahaaga laga rabo inuu xidho labis dugsi ama yunifoom. Waxa laga yaabaa in aad xoogaa gargaar heshid oo aad ku bixisid labiska – fadlan weydii dugsiiga ilmahaaga. Waxa kale oo ilmahaagu u baahan doonaa bedlad ah labiska waxbarashada jimicsiga (physical education - PE). Caruurta waa la soo celin karaa dugsiiga haddii aanay xidhnayn labiska sax ah.
- Waxay u badan tahay in lagaa rabi doono in aad xoogaa ah qalab asaasi oo ilmahaagu dugsiiga ku isticmaalo sida qallimo, masaxado iyo masdarado. Waxa kale oo ilmahaagu u baahan doonaa boorso ku filan inay u qaado buugaagta, kiish qallimo iyo dharka jimicsiga. Fadlan weydii dugsiiga ilmahaaga si aad u ogaatid waxa lagaa rabo inaad siisid.

Qado

- Dugsiiga waxa uu ilmahaaga siin doonaa cunto diiran wakhtiga qadada. Cuntadaasi waa u bilaash ama waa u lacag la'aan ilmahaaga magangalyo-doonka ah. Haddii aad heysatid sharci ama oggalaansho aad ku joogtid Boqortooyada Ingiriiska (UK), waxa laga yaabaa inaad in aad heshid gargaar aad ku bixisid kharashka cuntada – wixii faahfaahin ah fadlan weydii dugsiigaaga. Beddel ahaan, waxa aad ilmahaaga siin kartaa qado qabow oo aad u diyaariso oo uu u qaato dugsiiga.

Tagista Dugsiiga

- Haddii aad ku nooshahay meel si weyn uga fog dugsiiga ilmahaaga, waxa laga yaabaa inaad heshid xoogaa ah gargaar oo aad ku bixisid kharashka safarka dugsiiga ee ilmahaaga. Wixii ah faahfaahin dheeraad ah weydii dugsiigaaga ama maamulka waxbarashada ee degmadaada.

Cabsi-galinta (Bullying)

- Cabsi-galintu waa fal waxyeelo leh, ha ahaato mid jidhka ama hadal ah. Haddii ilmahaaga ay haysato dhibaato ah cabsi-galin ama la baado inta uu dugsiiga joogo, haddii uu qabo wax walaac ah, waxa muhiim ah in aad la hadashid ilmahaaga iyo macallimiintiisa. Isku day inaad wax ka ogaatid siyaasadda ka-hortagista cabsi-galinta ee dugsiiga lana shaqee dugsiiga iyo macallimiinta si aad gargaar uga geysatid xalinta xaaladda. Ha ka baqan in aad sii wadid arrinta ilaa adiga iyo ilmahaagu aad ku faraxsan tihiin natiijada. Haddii aad qabtid wax walaac ah waxa kale oo aad wici kartaa Khadka Waalidka (Parentline Plus) si aad u heshid talo iyo war lambarkooduna waa 0808 800 2222.

Sii-haynta Ilmaha

- Waxa laga yaabaa in adeegyo sii-hayn ilmo iyo taageero qoys ay ka jiraan aaggaaga ama xaafaddaada. Si aad wax uga ogaatid adeegyadaas, waa inaad wacdid Adeegga Warka Caruurta ee degmadaada (Children's Information Service). Waxa aad heli kartaa lambar teleefon haddii aad wacdid ChildcareLink adiga oo ka wacaya teleefonka wicistiisu bilaash tahay (freephone) oo ah 0800 234 6346.